

Codsiyada wuxuu waqtigodu ku eg yahay 5:00 galabnimo Maars 22, 2019

Adeegyada Bulshada Seattle (SPU) waxay hada aqbalayaan codsiyada loogu talagalay bixinta lacag isku dhiganta deeqda oo loogu talagalay mashaariicda xooga saaraya bulshada ee ku saaban ka hortagga qashinka. Ka hortagga qashinka macnihiiisu waa in la abuuro qashin yar adiga oo gadanaya isla markaana si hoose u isticmaalaya, isticmaalaya alaab dib loo isticmaali karo, isla markaana la wadaagaya ama ku deeqaya shey si dadka kale u isticmaali karaan. Marka aan ka hortagno qashinka, waxaan taageero ka geysanaa caawinta deegaanka ilaalinta caafimaadka dadweynaha, dhisida bulshada, iyo in la badbaadiyo lacag.

Ujeedooyinka barnaamijka deeqda:

- Taageerida hoggaaminta bulshada iyo fikradaha cusub ee ku aadan ka hortagga qashinka
- Kordhintaa helitaanka bulshada ee fursadaha ka hortagga qashinka
- Yareynta xaddiga alaabta noqonaysa qashin ee Seattle

Maalgelinta:

- Waxaaa jira maalgelin guud oo dhan \$100,000 si loo bixiyo habka deeqda ee 2019-20.
- Codsiyada deeqda waxaa laga yaabaa in ay ka koobnaato inta u dhaxaysa \$5,000 ilaa \$20,000. SPU ayaa leh xuquuqda ah in ay deeq ahaan u bixiso lacag yar ama lacag badan.
- Lacagta deeqda ah ee la bixinayo waxaa loo bixiyaa hab ku saleysan magdhaw.
- Lacagaha deeqda ah waa in lagu isticmaalaa 12 billood gudahood laga bilaabo taariikhda bilowga mashruuca. Deeqdu ma bixiso maalgelin joogto ah oo loogu talagalay mashaariicda.

Cida Ay Tahay In Ay Codsadaan

SPU waxay dhiirigelinasaa codsiyada ka socda:

- | | |
|---|---|
| <ul style="list-style-type: none">• Hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn• Kooxaha bulshada & xaadaha• Ganacsiyada• Dugsiyada, kulliyadaha & jaamacadaha | <ul style="list-style-type: none">• Ururada (sida daryeelka caafimaadka ama guryaha)• Ururada diinta ku salaysan• Barnaamijyada dhallinyarada iyo carruurta |
|---|---|

Codsadaayaasha waxay gudbin karaan wax ka badan hal codsi, laakin kaliya u qalma helida deeqda hal abaalmarin.

Codsadaayaashu waa in ay haystaan ruqsadaha ganacsiga ee Gobolka Washington iyo Magaalada Seattle si ay u helaan lacagaha deeqda ah, ama u shaqeeyaan iyaga oo adeegsanaya Wakiil Maaliyadeed oo haysta ruqsadaha loo baahan yahay. Wakiilka Maaliyadeed ayaa qaada mas'uuliyyada helidda iyo maamulka lacagaha deeqda ah ee loogu talagalay mashruucaaga. Waxay u badan tahay in Wakiilka Maaliyadeed uu qaado lacag gaaraysa 10% oo lacagta deeqda ah, taasi oo laga yaabo in ay soo magdhawdo deeqdu.

Caasimada Seattle warbixinta shatiga ganacsiga: <https://www.seattle.gov/licenses/get-a-business-license/cost-of-a-business-license>. **Warbixinta shatiga ganacsiga Gobolka Washington:** <http://bls.dor.wa.gov/faqlicense.aspx>

Dib u codsashada

Codsadaayaasha dib ayay u codsan karaan deeqda wareega maalgelin walba :

- Dib u gudbinta codsiga oo mashruuca aan lagu abaalmarin deeg. Wuxaan ku talineynaa inaad nala soo xiriirtid si aad u heshid sida aad sare ugu qaadi kartid codsigaaga oo wareega maalgelinta xigta.

- Gudbinta codsiga oo mashruuca cusub.
- Gubinta codsiga lagu balaarinayo mashruuc ama lagu fullinayo wajiga xiggo. Codsiga waa inuu muujiyaa ka hortaga qashinka la kordhiyay. La siiyo maalgelino oo laga yaabo inaan loo isticmaalin in lagu *waariyo* mashruuca ee heerarka ka hortaga qashinka jiray.

Shuruudaha Mashruuca

Mashaariicdu waa in ay buuxiyaan saddexda shuruudood ee soo socda si ay u codsadaan:

1. Mashaariicda waa in ay ka dhacaan gudaha Xadka Magaalada Seattle ama saameyn toos ah ku leeyihii qashinka Seattle. Codsadayaasha maxay ku ooli karaan meel ka baxsan Seattle, haddii mashruuca uu diirada saarayo Seattle.

Qayb weyn oo ah khariidada Xadka Magaalada Seattle ka fiiri internet-ka:

<http://clerk.ci.seattle.wa.us/~public/nmaps/fullcity.htm>

2. Mashaariicdu waa in ay xooga saarayaan ka hortagga qashinka.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Barida bulshada ee sida looga hortaggo qashinka
- Yareynta bacaha isticmaalka kaliga ah sida sare u qaadida cuntada raageyso iyo weelasha cabitaanka
- Qabashada meel wax lagu dacaytiro si dadka looga caawiyo in ay hagaajiyaan waxyabaha ay waxyeladu soo gaartay
- Tijaabinta qorshayaal cusub si aan loo yareeyo khasaarinta cuntada ee maqaayadaha
- Abuuritaanka nidaamka app si dadka looga caawiyo in ay wadaagaan cuntada iyo waxyabaha kale
- Wadaagista qalabka ee bulsho ahaan, halkii qof kastaa ka soo gadan lahaa mid u gaar ah
- Ku deeqida cuntada, dharka, ama waxyabobo kale si dadka kale u isticmaali karaan
- Ka dhigida cuntada iyo qashinka barxada ee dugsiga iyada oo laga dhigayo bacrimin ‘compost’’ si loogu isticmaalo beerta dugsiga ama bulshada
- Fikradaha kale ee hal-abuurka leh ee aad hayso ee loogu talagalay ka hortagga qashinka!



Deeqdu ma bixinayso lacagta mashaariicda ee xooga saaraya:

- Dib u warshadeynta qashinka “recycling”
- Nidaamka bacriminta ee ka baxsan goobta (ee lagu habeeyay isla markaana lagu gaday meel kale)
- Saamiyada baskiilkha iyo saamiyada baabuurta

3. Mashaariicdu waa in ay sameeyaan mid ama ka badan kuwan soo socda:

- **Noqdaan kuwo fikrad cusub keena:** tijaabi ama sii kordhi habab ama farsamooyin cusub, sida samaynta nidaamyada apps ama adiga oo dukaamada wax lagu dayactiro keenaya Seattle

IYO/AMA

- **Ku lug yeeshaan mid ama ka badan ee bulshooyinka soo socda:** bulshooyinka midabyada kala duwan leh, muhaajiriinta, qoxootiga, dakhliga hoose leh, dadka naafada ah, waayeelka, dhallinyarada waaweyn, dhallinyarada, carruurta, iyo/ama ganacsiyada yaryar

IYO/AMA

- **Caawiyaan bulshooyinka baahan:** sida kordhinta awood u lahaanshaha iyada oo la bixinayo illo bilaash ah oo qiimo jaban, ama tababarka shaqada ee guri la'aanta ama bulshooyinka daqliga hooseeyo

Shuruudaha Maalgelinta & Lacagta Isku dhiganta

MAALGELINTA:

- Waxaaa jira maalgelin guud oo dhan \$100,000 si loo bixiyo habka deeqda ee 2019-20.
- Codsiyada deeqda waxaa laga yaabaa in ay ka koobnaato inta u dhaxaysa \$5,000 ilaa \$20,000. SPU ayaa leh xuquuqda ah in ay deeq ahaan u bixiso lacag yar ama lacag badan.
- Abaalmarinada deeqda way ka hoosaan kartaa tirada lagu codsaday iqtiyaarka bulshada eegida iyo SPU.
- Lacagaha deeqda ah waxaa loo bixin doonaa hab ku saleysan magdhaw. Haddii kharashka u dambeeyaa ee mashruuca la dhammeystiray uu ka yar yahay miisaaniyadda, lacagta abaalmarinta ah waa dhimayaa.
- Lacagaha deeqda ah waa in lagu isticmaalaal 12 billood gudahood laga bilaabo taariikhda bilowga mashruuca. Deeqdu ma bixiso maalgelin muddo dheer oo ah oo loogu talagalay mashruuca. Codsadayaashu waxay sanad kasta dib u codsan karaan mid cusub ama mashaariic la balaariyay.

SHURUUDAH LACAGTA ISKU DHIGANTAA:

- Lacagta u dhiganta ee la bixinayaa waa in ay ugu yaraan ahaataa kala bar codsiga maalgelined (oo ah qimaha 50 cents ee doolarkii kasta ee ay Magaaladu bixiso).
- Codsadayaashu waa in ay qoraan lacagta isku dhiganta ‘match’ si ay u helaan credit.
- Lacagta qaaraanka ah ee isku dhiganta waxay noqon kartaa nooc ah ama mid lacag caddaan ah.
- Ilaha Magaalada Seattle, sida waqtiga shaqaalahaa Magaalada, isticmaalka xarumaha Magaalada, iyo/ama maalgelinta kale ee Magaalada laguma xisaabin karo in ay tahay qayb ka mid ah lacagta isku dhiganta ‘match’ ee la bixinayo.

SHARUUDAH CAYMISKA:

Guud ahaan, mashaariicda waxay u baahaneycaa caymiska xiggo:

- \$1,000,000 oo caymiska Masuuliyyada Guud ee Ganacsiga (CGL)
- \$1,000,000 oo caymiska Masuuliyyada Tooska ah ee Ganacsiga. Caymiska waa inuu ahaadaa isticmaalka gaariga ganacsiga, ma ahan caymiska gaariga shaqsiga. Sharuudaan waa laga dhaafi karaa haddii mashruuca uusan ku luuglaheyn baabuurta, ama haddii mashruuca kaliya isticmaalo gaadiidka shatiyeysan iyo ganacsi ahaan gaadiidka caymisan ama adeega gaarsiinta.
- Caymiska Magdhowga shaqaalahaa

Sharuudaha caymiska gaarka ah way ka duwanaaneysaa mashruuca. SPU ayaa kaala shaqeeynayo mashaariicda loo doortay deeqaha lagu aqoonsanayo sharuudaha caymiska. Qarashaadka caymiska gaarka ah ee kore caymiskaaga caadiga ah waxaa lagu dari karaa codsigaaga deeqda, oo ay la jiraan ugu badnaan \$500 lagu maalgelin karo dhinaca deeqda.

QAYBAHA KHARASHKA:

Kharashyada la magdhabi karo iyo lacagta qaaraanka ah ee isku dhiganta waa in ay si toos ah xiriir ula leeyihii mashruuca.

- Lacagta qaaraanka ah ee isku dhiganta ayaa laga yaabaa in ay bilaabanto taariikhda codsigu ku eg yahay.
- Kharashyada la magdhabi karo waxaa laga yaabaa in ay bilaabmaan marka qandaraaska lala leeyahay Magaalada la saxiixo.

	Kharashyada La Magdhabi Karo	Lacagta Isku Dhiganta
Waqtiga shaqaalaha loogu tallogaly mashruuca (waxaa ku jiri karo madax dushiisa)	✓	✓
Agabyada, alaabada iyo qalabka mashruuca	✓	✓
Adeegyada la xiriira mashruuca sida turjumaada, daabacaadda, iyo naqshadeynata	✓	✓
Ijaarka booska loogu talagalay hawlaha mashruuca	✓	✓
Cuntada iyo cabitaanka ee mashruucaaga la xiriiro howlaha bulshada, marka laga reebo cabitaanada aalkulada (tirada qofkiiba waa inuu macquul u ahaadaa mashruuca, oo ay la jирто ugu badnaan \$10 qofkiiba)	✓	✓
Abaalmarino loogu talagalay ka qayb qaatayaasha mashruuca (tirada qofkiiba waa inay macquul u ahaataa mashruuca)	✓	✓
Goobta gawaarida la dhigto iyo masaafada safarka shaqo ee la xiriira mashruuca ee gudaha Seattle (iyada oo la bixiyo heerka lacagta federaalka ee masaafada safarka shaqo)	✓	✓
Kharashyada wakiilka maaliyadeed (waa in aanay ka badan 10% oo ah wadarta mashruuca la bixiyay)	✓	✓
Qarashaadka caymiska gaarka u ah mashruuca ka koreeyo caymiskaaga caadiga ah (tirada caymiska waa inay macquul u ahaataa natijjooyinka mashruuca, oo ay la jирто ugu badnaan \$500 oo lagu maalgelin karo dhinaca deeqda)	✓	✓
Waqtiga tabarucaha loo qoondeeyey ee mashruuca, (qiimihiisu waa \$24/saacadii)	✓	
Kharashyada safarka la xiriira mashruuca ee magaalada ka baxsan		✓
Lacagaha kale ee deeqda ah ama lacagta qaaraanka ah ee isku dhiganta ee mashruuca (marka laga reebo maalgelinta kale ee laga helo Magaalada Seattle)		✓

Nidaamka Codsiga

JADWALKA:

Waqtiga Codsiyada Ku Eg Yihiiin	Maarso 22, 2019
Ogeysiiska Go'aannada	Maayo 2019
Heshiiska lala gaaray Magaalada la Saxiixay	Julaay 2019
Shaqadu Bilaabmayso	Julaay-Oktobar 2019
Shaqada La Dhammeystirayo	12 bilood gudahood taariikhda bilowga mashruuca

TALAABOOYINKA CODSIGA:

Talaabada 1: Aqri Jaheynada

Talaabada 2: Nala soo xiriir

- Xaqiji in mashruucaaga la heli karo
- Weydii su'aalaha ku saabsan tilmaamaha la raacayo iyo codsiga

Talaabada 3: Ka qayb gal mid ka mid ah kulamada macluumaaadka ee deeqda (WAAJIB MAAHA)

Wuqoyiga Seattle	Bartamaha Seattle	Koonfurta Seattle	Galbeedka Seattle
Janaayo 15, 2019	Janaayo 26, 2019	Febraayo 4, 2019	Febraayo 9, 2019
5:30-7:00 PM	12:00-1:30 PM	5:30-7:00 PM	12:00-1:30 PM
Maktabada Green Lake 7364 E Green Lake Dr N	Maktabada Montlake 2401 24th Ave E	Maktabada Columbia 4721 Rainier Ave S	Maktabada Delridge 5423 Delridge Way SW

Fadlan codso turjumaada luqadda ama waxyaabaha kale **ugu yaraan hal toddobaad** ka hor kulanka.

Talaabada 4: Soo gudbi codsigaaga deeqda oo qaab daabacaad ama fiidiyow ah muddo aan ka dambeyn Maars 22, 2019.

- Foomka Codsiga Daabacan (waa in aanu ka badnaanin 7 bog)
- Tilmaamaha Codsiga Fiidiyowga ah (waa in aanu ka badnaanin 20 daqiqo)
- Foomka Codsiga Miisaaniyadda (oo loogu talagalay codsiyada la daabaco iyo kuwa fiidiyowga ah labadoodaba)

Codsiyada waxaa lagu soo gudbin karaa luqadda aad doorbidaysa. SPU ayaa bixin doonta turjumaad/fasiraad.

Dib u eegista Codsiga

KOOXDA DIB U EEGISTA:

Kooxda dib u eegista deeqdu waxay ka kooban tahay xubno bulshada ka tirsan iyo shaqaalahi Magaalada Seattle oo ka kala socda dhaqamo kala duwan iyo meelo kula duwan ay khibrad u leeyahiin.

SHURUUDAH DIB U EEGISTA:

Mashruucyada ayaa marka hore dib loo eegi doonaa si loo xaqijiyo in ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay mashruuca. Ka dib kooxda dib u eegista deeqda ayaa qiimeyn doonta mashaariicda loo qalmo iyada oo ku saleynaya liixa shuruudood oo wax lagu xulanayo ee hoosta lagu qeexay. SPU waxa sidoo kale tixgelin siin doontaa kala duwanaanta goobta deegaanka, bulshooyinka uu saameeyay, iyo noocyada mashaariicda.

1. (30%) **Ka hortagga Qashinka:** Awoodda mashruucu u leeyahay ka hortagga qashinka.

- Mashruucu ma awoodi doonaa in uu cabbiro guusha?
- Waa maxay suurtgalnimada in la yareeyo miisaanka iyo tirada maaddooyinka soo gelaya qashinka?
- Waa maxay suurtgalnimada in bulshada la gaaro iyo in la sameeyo isbedel dabeecadeed?
- Sidee ayaa ka hortagga qashinku u saameyn doonaa in mashruuca sii socdo ka dib marka ay dhammaato deeqdu?

2. (15%) **Fikradda cusub:** Mashruuca wuxuu adeegsadaa habab ama farsamooyin cusub.

- Sidee baa mashruuca loo tijaabin doonaa ama loo balaarin doonaa hababka ama farsamooyinka cusub?
- Mashruucu miyuu samayn karaa wax shabaha kuwa kale ee ka jira bulshada dhexdeeda?
- Sidee baa hababka iyo natijjooyinka mashruuca loola wadaagi doonaa bulshada?

3. **(15%) Ka qayb qaadashada Bulshada:** Awoodda mashruucu u leeyahay in uu si waxtar leh bulshooyinka uga qayb galiyo ka hortagga/dib u isticmaalida.
- Mashruucu miyuu adeegsanaya qorshayaal ka qayb qaadasho oo waxtar u leh dhageystayaasha?
 - Sidee ayaa bulshadu uu saameeyay ugu lug yeeshaan qorshaynta iyo hirgelinta mashruuca?
 - Sidee buu mashruucu ula shaqeeyaa bulshada?
 - Sidee buu mashruucu ugu qayb galiya bulshooyinka midabyada kala duwan leh, muhaajiriinta, qoxootiga, dakhliga hoose leh, dadka naafada ah, waayeelka, dhallinyarada waaweyn, carruurta, iyo/ama ganacsiyada yaryar?
4. **(15%) Faa'iidooyinka Bulshada:** Awoodda mashruucu u leeyahay in uu faa'iidooyinka u keeno bulshada.
- Sidee buu mashruucu ugu faa'iidayn karaa bulshada (sida hagaajinta caafimaadka dadweynaha, bixinta shaqooyin ama xirfaddo shaqo, ama bixinta ilo lacag la'aan ah ama qiime jaban leh)?
 - Ilaa heer intee le'eg ayuu mashruucu u faa'iideyn karaa bulshooyinka inta badan baahida qaba, sida bulshooyinka hoy la'aantu hayso ama dakhligoodu hooseeoyo?
5. **(15%) Awoodda Mashruuca:** Awoodda mashruuca u leeyahay in uu guulaysto waxay ku xiran tahay awoodda uu leeyahay.
- Mashruucu ma leeyahay shaqaale ku filan, dadka iskaashi ka dhexeeyo, tabarucayaal, iyo ilo dhaqaale si uu u guuleysto?
 - Miyaa iskaashiga mar hore la meelmariyay?
 - Mashruucu ma leeyahay aqoonta, xirfadaha, waayo-aragnimada, iyo cilaqaad si uu u guuleysto?
6. **(10%) Miisaaniyadda:** Awoodda mashruuca u leeyahay in uu guulaysto waxay ku xiran tahay miisaaniyadda la soo jeediyay.
- Miyay miisaaniyadda is waafaqsan yihiiin soo jeedinta mashruuca?
 - Qiyaasta miisaaniyaddu ma saxbaa?
 - Dhammaan kharashyada ma ku habboon yihiiin deeqda?
 - Lacagta la codsaday ma mid macquul ahbaa marka la eego natijjooyinka laga filayo?

Heshiiska & Bixinta Lacagta

HESHIISKA:

- Dadka helay abaalmarinta deeqda ah waa in ay haystaan ruqsadaha ganacsiga ee Gobolka Washington iyo Magaalada Seattle si ay u helaan lacagaha deeqda ah, ama u shaqeeyaan iyaga oo adeegsanaya Wakiil Maaliyadeed oo haysta ruqsadaha loo baahan yahay.
- Dadka helay abaalmarinta deeqda ah waa in ay qandaraas la saxiixaan SPU si ay u helaan lacagaha deeqda ah. Heshiiska waxaa ku jiri doona hadalo iyo shuruudo dheeraadka oo deeqdu leedahay.
- Dadka helay abaalmarinta deeqda ah waxay maamuli karaan lacagahooda deeqda ee u gaarka ah ama waxay isticmaali karaan wakiil maaliyadeed. Kharashyada wakiilkha maaliyeed waxaa laga qaadi karaa deeqda ama waxay khusayn karaan lacagta qaaraanka ah ee isku dhiganta. Dadka helay abaalmarinta deeqda ah ee dooranaya in aysan isticmaalin wakiil maaliyadeed waa in ay keenaan lambarkaaga aqoonsiga canshuurta una hoggaansamaan xeerarka Adeegyada Dakhliga Hoose.
- Deeqdu waxay kaliya magdhabi doonta kharashyada dhaca ka dib marka qandaraaska la saxiixay.

WAKIILADA MAALIYADEED:

- Codsadayaashu waxay dooran karaan in ay la shaqeyyaan Wakiil Maaliyadeed ee qaada mas'uuliyada helidda iyo maamulka lacagaha deeqda ah ee loogu talagalay mashruucaaga.
- Codsadayaasha ayaa mas'uul ka ah aqoonsiga Wakiilkooda Maaliyadeed ee u gaarka ah iyo xaqijinta ah in Wakiilkaasi Maaliyadeed uu hada haysto ruqsadaha ganacsiga ee Gobolka Washington iyo Magaalada Seattle oo cusub.
- Waxay u badan tahay in Wakiilada Maaliyadeed in ay qaadaan lacag gaaraysa 10% oo lacagta deeqda ah. Wuxuu lacagta ku dari kartaa miisaaniyadda mashruucaaga.

BIXINTA LACAGTA:

Dadka helay abaalmarinta deeqda ah waxay bil kasta ama saddexdii bilood ee kasta gudbin karaan biilasha taasi oo loogu talagalay kharashyada la xiriira mashruuca. SPU waxay boosta ku soo diri doontaa jeegaga magdhawga ah muddo afar toddobaad gudahood ah marka la helo biilka. Bixinta lacagta dib ayaa loo dhigi doonaa haddii biilasha aanay dhammeystirnayn ama ay maqan yihiin warbixino iyo dokumentiyo loo baahan yahay.

SOO SHEEGIDA:

- Dadka helay abaalmarinta deeqda ah waxaa looga baahan yahay in biil kasta oo ay soo dirayaan soo raaciyaan warbixinta horumarka la samaynayo.
- Ka hor inta aan la helin lacagta deeqda ee ugu dambeysa, dadka helay abaalmarinta deeqda ah waa in ay soo gudbiyaan warbixinta kama dambeysta ah ee la wadaagayo ee natijjooyinka mashruuca iyo casharradii laga bartay. Warbixinta waxaa laga yaabaa in la soo geliyo website-ka SPU.

Nala Soo Xiriir

La xiriir wastefreegrants@seattle.gov ama (206) 684-7868 si aad u hesho caawimaad Af-Ingiriisi ah ama luqadaha aanan hoosta ku qornayn

Wixii caawimaad ah ee la xiriirta luqadaha soo socda, la xiriir ururka iskaashigu naga dhexeeyo, ECOSS info@ecoss.org ama (206) 767-0432 ext. 1009. Fadlan dhaaf fariin qof ayaana soo celin doona wicitaankaaga.

- | | |
|-------------|--------------|
| • Amharic | • Soomaali |
| • Cantonese | • Isbaanish |
| • Khmer | • Tigrinya |
| • Korean | • Vietnamese |
| • Mandarin | |